

ku warbiyow



Dhibaatooyinki dooheed oo luku maraaw
ololaagi tilaalki dabeeli dalki Soomaali
gudoosheey: Maybaa diiridi liki saareey dadki ki
dowahaaw lahjadi Maaygi oo ki nool Banaadir





Geber yar oo Shiidli eh yaa hadigi madigi inki duubiti si yee reershee biyi inki dhaamiidu hiridi barika'iyaalki Al-Biri oo binaanki Hamar.
Mudunaan: Mohamud Utaama

Mahadnagoow

Ma'alumaadkun walii la haa saareey yoo ga'an dhagaali ku heli Hay'addi Bill & Melinda Gates Aasaasigi eh. Nuhurki ma'alumaadkun yaa eh masuulyadi bes eh oo leti koohdi Huguugdi dadki luku tiri baddinyi oo aduunki. Haalid kasti mal in tihgiliyi koru inii ku turjumaasu go'aanki Bill & Melinda Gates Foundation.

In mahadnagoowki Abtugaagi

Walii fadeeyi inii in mahadnagu dhamaan ku giibgaadidiyaalki daraasidin. Araktida walii niin lahaayteey giimi uni ii bulshi wiinti bini'aadintinimadi walii rajeeyaanee inii in horseedi doontu barnaamij aafimaad oo hormarsin ii ololiyal tilaalki dabeeli oo bulshidaa.

Walii jeelaadi lahayneey inii in mahadnagu shabakadi in doodoowki bulshooyinki liin kasaaw (MCAN) Haruunti Hormariyoowki Doohadi Juba (JVDC) ii Humanity & inclusion for Sustainable Advocacy (HISA) taagyeeroowshoo ilmi-baaroowkin. Gaar haan walii jeelaadi lahaayneey inii in mahadnagu koohdi ilmi-baaroowki. Ku so'odo HISA walii in mahadnägeeyi Shukri Abass, Ibrahim, Yusuf Abdulahi Ibrahim ii Faiza Isse Mubarak. Ku so'odaan JVDC: Abdullahi Aweis Hussein, Safiya Hussein Garad ii Abdi Salad Mberwa. Ku so'odaan MCAN: Ismail Maxamed, Fowzia Cabdullahi ii Naciima Cismaan Cabdi.

Walii mahad gooni eh in jeediyeeyi Safiya Shucayb ii Mohamed Eno oo ku so'odi MRG oo iski toosiyi daraasidin ii Claire Thomas oo yee suubiidi ooni kormeeraasi duraasadkun.

Ku so'outu CLEAR Global, walii jeelaadi lahaayeey inii in mahadnagu Ingrid Gercama ii Christine Fricke, oo hogaaamiyaayi ilmi-baaroowki, Restine Andrea Portugal ii Ellie Kemp, oo biyaayi taagyeeri ilmi-baaroow ii Alyssa Boulares oo haayi maamulaagi barnaamijki.

© Minority Rights Group International (MRG), Oktoobar 2023.
Dhamaan huguugoo hifdiyien.

Alaaboo daaba'oowkin walii liin saari koree walbaroow misi arimi kali oo gana'si in haayni. Qiib kumid eh mel ku yaabu inii reed la haku daaba'u si kastoo liiku danleyi, haatooy injeedi gana'si, la'aantiye ogolaashi ed oo hori oo ku kooyti haan haaysidu huguugdi daaba'oowki. Walii ma'alumaad dheeraad eh fadlan kuli hariir MRG. Diiwaanki buugi CIP oo daaba'adin yaa luku heli kori matabidi Ingiriiski. **ISBN** Online 978-1-915898-10-4. **Li daaba'l** Oktoobar 2023.

Dhibaatooyinki dooheed oo luku maraaw ololaagi tilaalki dabeeli dalki Soomaali gudoosheey: Maybaa diiridi liki saareey dadki ki dowahaaw lahjadi Maaygi oo ki nool Banaadir walii daaba'eey MRG si galin inki jeeysitu fahamki dadwiinaagi oo arinti ki koobin mowduu'shee. Qoraalki ii ra'iyyigii abtugaagi gasab mi eh inii turjumaayaan si fafaahsin ii dhamaan dhiniyaalshee aragtidi guud oo MRG.

Minority Rights Group International

Minority Rights Group International (MRG) waliibuwaa hay'ad dowli ahaani (NGO) oo ku shaqeeyaasu suugiteedi haguugdi bulshiyaalki. Diinti ii afki luku tiri badinyi ii dadki asalki eh oo aduunki dhon ii inii hormariyaan iskaalidoowki ii isfahanki ku dhaheeyu bulshiyaalki. Hooloogeen walii hoogi ki saarneey in doodoowki aalamigi eh, tabibaroowki, daaba'oowki ii wa'iigiliyoowki. Walii ni hageeyi baahiyoo yoo muujyeen shabakadoo hay'adood islishageeyaanu oo aduunki haanaas oo mataalaayaan dadki luku tiri badinyi ii haan asalki eh.

MRG walii li shageeyeyi in ku badin 150 hay'adood oo ki yaalu ki dhowaad 50 waddin. Koothdeey maamulki oo shiraaw lami jeer sinidki walii giib ku eyiinaa 10 wadin oo shalshalgedisir. MRG walii heer li talidoow kili leyaa Koohdi Dhagaaloo ii Bulshidi oo Wadamoo Iniskooyeen (ECOSOC), ii heerki ku wargoboowki oo gudigi Afriki oo Haguugdi Bini'aadinki ii Dadki (ACHPR). MRG walii in diiwaangalinaya samifal haan ii shirked ki hadidin damaanid sidi usi dhikaaw shar'igi Ingiriiski. Lambar 282305, shirkidi hadidin lambar 1544957.

CLEAR Global

Hadafki CLEAR Global waliibuwaa inii dadki ku aawiyu sidii in heli lahaayeen ma'alumaad muhiim eh oo li dheegaaw afkasti oo yoo ki dowahaayaan. Walii ku aawiyaasee haan kali oo faa'idi weydiiski inhaani inii dheginsidaan oo si waltar leh in li hariiraan dadki yoo in adeegaayaan – yee oo liin maraaw ma'alumaadki ii ilmi-baaroowki turjumaadi ii kaalmeeyoowki dhegoowki, tabibaroowki ii talidi ii haliteedi tiknolojigi afki oo ku giibgaadidoowki bulshidi.

Humanity and Inclusion for Sustainable Advocacy (HISA)

Humanity and Inclusion for Sustainable Advocacy (HISA) waliibuwaa hay'ad samifal oo dowli in haani ii too faa'idi weeydiis in haani oo li aasaasi sinidki 2000 oo ku shageeyaaasu hagaajivoowki haalidi bilaangti Soomaalidi. Himilidi hagaasu HISA waliibuwaa aamiinsinaanti inii taagyeeroowki bilaangti awood in weeldhidi koraan inii isbedeli toosin ki subiyaan nolollyoow. HISA walii ki dedaalaasee inii yeraaytu tiridi bilaangti lii jeeysidaaw dhibaatidi yee oo awood in siyasu inii helaan ilmi ii madi-binaanaan dhagaali oo wiing.

Juba Valley Development Center (JVDC)

Haruurnti hormariyoowki Doohadi Jubba (JVDC) waliibuwaa hay'ad deegaanki eh oo dowlidii in lahaani (NGO) oo si rasmii ah inku diiwaangalin Wasaaridi Aafimaadki ii Edeegi Bulshidi Jubbaland. Walii in shageeyaasee sidi hay'ad siyaasideed oo in haayni (NPO) walii in shageeyaasee sidi hay'ad Bulshi ki saleysin oo metelaaw koohoo luku tiri badinyi ii haan li tokooraaw. JVDC waliibuwaa too kumid eh ha'yadoo hogaaniki in haayu dadki luku tiri badinyi walii la aasaasay 2002 dii magaalidi Hamar, Soomaali.

Marginalized Community Advocacy Network (MCAN)

Marginalized Community Advocacy Network (MCAN) waliibuwaa urur wadan oo dawlidii in lahaani (NGO) oo li aasaasi 2006 tii gudoo Soomaali si yee in aawiidu dadki nugul, haan luku tiri badinyi ii koohoo li tokooraaw. MCAN walii kor in gaadaasee, oo in doodaasee oo kob'yaasee isbedeleedi bulshidi, dhagaali, ii siyaasideed oo ku dhah jero koohoo nugul oo bulshiyaalki li tokooraaw ii haan luku tiri badanyi oo Soomaali gaar haan dhalinyeridi, iyaalki ii bilaangti dhinigi ilaaliyoowki, dhimoowki fagiirnimidi ii hormariyoowki dhagaaloo ii ku giibgaadidoow siyaasideed oo liin dhonyi yee oo liin maraaw walgobidoow bini'aadintinimi, hormariyoowki, in doodoowki ii walgobodoowki kob'yoowki awoodi oo gaabki ku giibgaadidiyaalki.

Shahdi Nuhurki

Haaa kooboowki	1
Asalki: Ma'anaagi guud oo afki Soomaaligi	2
Habki Baaroowki	2
Natijjooyinki Muhiimki eh	3
Dadki ki hadaaw Maayga mi fahamaayaan (si buutu) ololiyaalki tilaalki dabeeli	3
Dadki ki hadaaw Maayga mi fahamaayaan (si buutu)sawirki ii alaabti arigi	3
Fahamlaanti ololo tilaalki ii ma'aluumaadki yaa ki daree dareenki horaan in jeri oo tokoroowki ii tokoroowki dadki ki hadalaaw Maaygi	4
Fahamki gaabin walii luku yaabee inii hadidu kalsoonidi oliloo tilaalki	6
Hataa markii duuboowki liki akriyi Maaygi, eriyaalki bershee mel fahamni	6
Ilmigi ki saabsin tilaalki dabeeli yaa yer	6
Sabibti oo eh ma'aluumaadki mel ki heli koru afshoo, dad badin mi goridaayaan meel in bahaayaan misi me helaayaan adeegi aafimaadki.	7
Dadki Maaygi ki hadalaaw ma'aluumaadki aafimaadki inii afshoo liinki gudbiyu yaa fadaayaan	7
Lifaaqi 1 – haa gaabiyoow	8
Lifaaqi 2 – habki baaroowki (Wal sii wedi)	9
Aruuriyoowki hogoo aasaasigi eh	11
Tihgiliyoowka edebti	12
Hadidinaan	12
Lifaagi 3 – Erey biyoowki muhiimki eh	13
Lifaagi 4 – tijaabiyoowki sawirki	14
Lifaagi 5 – tijaabiyoowki goobti raadiyaagi	16
Tixraa'oow	19

Liisky sawirka ii jawalki

Sawirki 1: Baabuur isti'imaalaayaan wa'iyi giliyaalki aafimaadki si yoo in faafiyaan ma'aluumaadki aafimaadki	3
Sawirki 2: booriteedi li tijaabiyi	4
Shahdi 1: Gooboo Ilmi-baaroowki	9
Shahdi 2: Tiridi ku giibgaadidiyaalki	10
Shahdi 3: Diiwaanki ku giibgaadidaagi	10
Shahdi 4: Sidi boorirki liin tijaabiyi	12

Haa kooboow

‘Mey in baahanaa intii iin sheenu tilaalky dabeeli qof ani aamiini koru ooni fahami koru oo oo dhaadhiciyi koru inii ani tilaalu owlaadeey.
Saaswuh si ani fadhaaw.’

Dagaal haa nanagidi, abaar ii fatahaad yaa ki hoogti reeri badin inii in guuraan gudoo Soomaali. Reeri oo haku guureen deegaanoo Koonfurti oo intiyoo badin ki hadalaaw afki Maaygi yaa haan guuri hiriyaalki dadki dalki gudoosheey in guuraayaan (IDP) oo hareeroow aasimidi Hamar.¹ Aafimaadki ii edeegoo kali oo bini'aadimnimidi yaa inti badin ki bahee afki Mahaatirigi harooyinki dhatiyoow ii saas oo kali ololaagi dhiirigelyoowki tilaalki dabeeli.² Dadaalidi liki deeraaw gjimooyoowki bogolkiibi bogol oo tilaalki dabargooyoowki udurki dabeeli³ yaa sheenti su'aali e inii dadki ki hadalaaw afki Maayki dabeeli si feyli in fahamaayaan oo saas oo kale inku dhaadhiciyi koraayaan macluumaadki dabeeli dadki ki hadalaaw afki Mahaatirigi.

Inti badin mey la haku gaadeeyi oo li fileeyi inii dadki li tokooraaw, dadki luku badinyi iyo dadki ki hadalaaw afki Maaygi yoo fahamaayaan oo ki wadi hiriiraan lahjadi inti badin li isticmaalaaw oo Maxaatirigi. Ilmi baaroowkin ujeedidiis maybuwaa inii li fahamu inii hariir li leyti heerki tilaalki dadki ki hadalaaw afki Maayki oo ki nool degmidi Banaadir uleesidi afki iyo isli hariiroowki.

May haa dareereey doodoo ki saabsin inii Maayki ii Mahaatirgi eed iniiski egyiin oo liinki tahgeliyi koru inii eyiin lahjadi oo hal af iski e misi eed in shal badelinyiin oo liinki tahgeliyi inii eyiin lama lahjadood oo shal e.⁴ Ilmi baaroow uni suubiini yaa muujiyi inii dad badin oo ki

hadalaaw afki Maaygi runtii dhibaati eed eh kuli kulimaayaan afki Mahaatirigi gaar ahaan dadki ku kooyi baadiyaadi ii dadki heer shoo wal barashi oo rasmigi eh hooseeyu. Eed yaa inki adkaadi korti inii fahamaan ma'luumaadki usub misi kakin oo ki saabsin arimoo lin kasaani sidi arimoo aafimaadki oo udureedi, jiditee liniiski gudbiyaaw, ii tilaaleedii sidaas daraadiyee dadki ki hadalaaw Maayki oo inki hadalaani Mahaatirigi may eed inki badintaa inii yoo gefaan tilaaleedi ii hanaaneeyoowki kali oo nafoo liki badbaadiyaaw markii liin firiyu haan Mahaatirigi ki hadalaaw.⁵

Inti badin dadki ki hadalaaw halki af oo Maaygi eh mi fahamaayaan inti badin fariimoo aafimaadki oo ku saabsin ololo udurki dabeeli ii talaalki dabeeli oo shagaaligi aafimaadki ki faafiyaaw lahjadi Mahaatirigi. Sheeyow muugaalki eh ii sawiraanti li so'odaan dhigaali Mahaatirigi oo adeegsidaayaan shagaaloo aafimaadki si yoo inki sharahaan hooloo ii taboo tilaalki dabeeli yaa saas oo kali si feyli liinki fahamaani. Dadki intiyoo badin inii ki tiirsinaadaan yu sahibeediyoow ii dadki kale oo reerki ku mid eh sidi turjumaan oo rasmi in haani misi inii iski deyaan inii ma'anaagi ki abiraan jirshoo. Tan may kordhiyaasee halisti is fahan laanti. Saas daraadiyee hanoo ki hadalaaw Maaygi miisku diiwaan giliyaayaan barnaamisheedi li so'odsiyoowki tilaalki kalsooni dori daraadiyee misi may iski daaweyaayanaa siyaabi kali.

Asalki: Ma'anaagi guud oo afki Soomaaligi

Soomaali inki yaraan 10 afood misi lahajadood oo sha shal duwin yaa liinki hadalee inkastoo si rasmi eh liinki agoonsini misi eed liinkuku dowahaani.⁶ Hanoo badin oo aftiteedaas kumid eh miin jeraan hab dhigaal eh misi sifeyli liinkiki baridaani sidii afiti dhigin. Inkastoo injerni hog tiri-koob oo daboolaasu adeegsidoowki afki hadini maybaa edaa intii dadki Soomaalidi yoo ki dowahaayaan lami afood misi lahajadood kooshoo: Mahaatirigi (oo in badin Tukud ii bartimaagi Soomaali) ii Maaygi (meeli badin oo ki tirsin Koonfurti Soomaali).⁷ Inkastoo Maaygi eyi af wadan, hadini may liin adeegsideeyi maamulki dowladi oo in badinti Dowlad-goboleedki-Koonfur-orsi ii meeli badin oo ki tirsin Koonfurti Soomaali, laakiin miki jertu aasimidi Hamar. May luku yaabee inii liin maleeyu inii markii reero ha ku jeedu meeloo liinki hadalaaw Maaygi kooyaan Hamar yoo awoodaan inii si degdeg eh in baridaan Mahaatirigi maadaama lamidi afood inii dhowyiin. Tan may nagidi

kortee too run in eh dadki bersheey laakiin sidi dhabti eh ma eh ti run in eh dadki dhon. Baaritaankin dadki liki sameeyi yoo dhon maharan wal dhowaan Hamar kooyi awoodiyoo ki hadaloowki Mahaatirigin shal bedelinaayi. (firi shahdi 2)

Afki may mudi dheer haayeey arin murin ii is-khilaaf ku teeginyi Soomaali. Ku hor intii si rasmi eh liinki usini habki dhigaalki iyo hingaadi aadigi eh oo Soomaaligi, may liin isticmaali jireey ujeedi kasti oo qoraal eh afiteedi Ingiriiski, Taliyaanigi, ii Arabigi oo eh afki Qur'aanki kariimki eh ii walbarashidi dugsiyidi Arabigi. Dadki ki hadalaaw Maaygi may in arigaayeenaa haa bandhikoowki farti Soomaaligi oo halbeeg in eh oo liki saleeyi lahajada shal badelin oo Mahaatirigi oo liinki hadalaaw bartimoo ii Tukud inii li dafiri hagshoow af-soomaaligi. Intii liki jeri dagaalidii sokeeyi dadki ki hadalaaw afki Maaygi may si guul leh inki ololeeyeenaa inii Maaygi li siyu derijidi afki wadanki oo lijertu Mahaatirigi.⁸

Habki Baaroowki

MRG ii CLEAR Global may iskaashi li suubiyeenaa sedi hay'adood aafimaad oo Hamar ku hoolgalaaw (firi lifaaqi 2 walii ma'aluumaa dheeraad eh oo ki saabsin habki). Mutadhawi'iinti aafimaadki may haa abaabuleenaa waraysiyi baahad leh oo li weeldhideon 24 ki hadalaayaan afki Maaygi⁹ oo sedi goobood shal roogaan may baani edeegsideenaa alaab shal shal gediiisin oo hab tayi leh eh oo ki jeraan fahamki baaritaani. Ilmi baariyaalki may waydiyeenaa dadki ki hadalaaw Maaygi inii yoo fahamaan

dhowr sharahaad oo eh dheginsid oo la duubi (Maxaatiri ii Maay) ii booriti li isticmaali intii liki gudi jeri ololoo tilaalki dabeeli ee UNICEF, Wasaaridi aafimaadki (MOH) ii la-hoolgaliyaalshoo. Koohdi may saas ookali tijaabiideey fahanki erey biyoowki muhiimki eh oo Mahaatirigi yoo oo ki hadalaayaan Maaygi. Inti badin dadki li waraysidi may ki noolaayeenaan hiriyalki baraka'ayaalki oo walni in abtugi korni walni in akhriyi korni (*Lifaagi 2*).

Natijjooyinki muhiimki eh

Dadki ki hadalaaw afki Maaygi mi fahamaayaan (buutu) ololo tilaalki dabeeli

Ki howlgaliyaalki aafimaadki oo faafiyaaaw ma'aluumaadki ki saabsin ololiyaalki tilaalki yaa hogti ki gudbiyi doo biyiyal ki rakaban baabuurti, idaa'adoo oo biyaaaw ma'aluumaadki markii boogidaayaan haruumoo aafimaadki aadi iyo iyaalki (MCHs). Ma'aluumaadki inti badin may liki faafiyeyi lahajadi Mahaatirigi waana may ilmi-baaroowkaanu liki ogaadeey in dadki ki hadalaaw Maaygi yoo intiyoo badin (si fayli) inki fahamaani.'

'Mi fahamaa walaa baabuurti sheegaayaan', yaa eri nin ku socodi Wadajir, Banaadir, oo ku hadalaayi ololo tilaalki dabeeli ee moobeeleedi oo isti'imaalaayaan od-biyiyal ii sanduugyi muusiki oo saarin baabuur liki sawiri fariimoo ololaagi (*firi sawirki 1*). Niyi jab yaa ki nagati usi, maybaa ereey: 'May fadheeyi inii uni dhageysinu wal uni fahami kornu oo walk u baridi kornu'. Hadii yoo ki hadalaan Maay fahami korni. Mahaatiri eed yaa niinki adigti', yaa ki sii dari. Islaan isku reer eyiin yaa yeeni ki raacdii: 'Koohdi ololo tilaalki markii kooyaan hiridi, me eh dad ani fahami koru. Marki, markii hiridi galaan yoogi oo li wareegaaw tilaalki owlaadi, miki hadalaayaan af ani fahamaaw.

Tijaabiyoowki fahamki dadki ki hadalaaw Maaygi oo Mahaatirigi liki hadalaaw may tusaasee inii ki dhowaad dhamaan dadki yoo fahameen wal eed in yar oo ku mid eh ajaladoo luku duubi Mahaatirigi (*firi lifaagi 5*). Ereyalki isku dhawaag ma'eh. Hanoo badin oo kumid eh eriyaalkun ma haayni wal li fahami koru. Dadki intiyoo badin waliibaa fahameenaa kali hanoo ku mid eh walaa lahaa duubi: hanoo badin walbi ma fahamni. Maadaama dadki fahanshoo afki Mahaatirigi eed in koobinyi, may lay fahami koraanaa ereyadi muhiimki eh oo eti inii yoo abiraan mowduu'i wada dohowoowki. 'May lee fahami koreey ereygi "baraka'a yaalki" (dadki barakai) may lee abireey inii yee eti tilaalki dabeeli.'

Maroo bershoo turjumaaneedi rasmigi in haani sidi deriski misi ashaabti way kaalmeeyaayanaa dadki ki dowahaaw Maaygi inii fahamayaan ma'aluumaadka yoo wadaagaayaan shagaaloo aafimaadki oo Mahaatirigi. Islaan, tusaali ahaan' may sheegteey inii markii haruunti tilaalki lahaa boogidu yoo ki tiirsinyiin turjumaan si yoo inki fududaayu wadahadalki. 'May jirtee dhibaati dhinigi luugudi eh, laakiin may isti'imaaleeyi turjumaan inkastoo dhiyi kortu inii wal yar fahamu.' Haaladoogin oo kali turjumaanki mi tababarin oo inti badin may leyaa agoon



Sawirki 1: Baabuurti isti'imaalaayaan wa'ayigiliyaashi aafimaadki si yoo in faafiyaaan ma'aluumaadki aafimaadki

caafimaad oo yar. May luku yaabee inii taas sheenti inii dadki dhaheen walwalbi mi fahamni markii yoo ki tiirsinyiin turjumaan oo yoo sheegeen inii liin aamiini korni ma'aluumaadki waabi yeraatoo. 'Tilaalki lugtaa luku gaadideeyi misi galinti? Taas yaa noo weeli inii is fahami waynu' yaa erti too ku mid eh bilaanti oo aawimaad ku heli turjumaan ku mid eh beelitiyeet.

Dadki ki hadalaaw Maayga mi fahamaayaan (si buutu) sawiridi ii alaabti arigi

Aawinti muugaalki leh oo tilaalki dabeeli mal fahamni (si buutu) (*firi lifaagi 4*). Dadki ki hadalaaw afki Maaygi yaa fahami waayeen dhigaalki Mahaatirigi oo sawiraanti liki macneeyi (hanoo badin yaa eh hanoo in abtugaani waani in akhriyaani Mahaatirigi) maybaa sheegeenaa inii sawiraanti in haani hanoo ku turjumaaw waayiarginimidiyoo nololeed. 'Shaksigin miin nag shaksi ani kasaaw. Wiligeey ma arigni dadkin. Hataa ma eri koru dadkun dad Soomaali eh wu', yaa erti islaan guri ki degin Deyniile, Banaadir. 'Dareemi kori dadkaas mi eh haanoo haku jeedo bulshidi tay', yaa erti islaantoo kali. 'Ani si ani in fahamu dadki keey inii sameeyaan wu, oo luku weelu koo liiski hiri koru, shagaalooni inii nagidaanwu dad afkeen ii dhaginkeen fahamaaw, dadki bulshiditeen haku jeedu'. Boorarki ii dhigaalki inii si nadiif eh liin sawiri wu: 'Inii lahaadaanwu far wiwiin oo nadiif eh.'

Boorki biditi yaa liin suubiyi inii liki sharahu ooni liki baru muwaadiniinti Soomaalidi alaamadoo ii astaamoo udurki dabeeli. Dadki maybaa awoodeenaa inii

Calaamadaha hore ee cudurka dabeyshu waa:



Sawirki 2: Sawir liinku taligali inii liki sharahu ooni wal liki baru dadki Soomaalidi alaamidoo dabeeli.

agoonsidaan inii boorki ki saabsinyi iyaal jirin (Onogi mandahoohaayi usu oo isku jiifu', Gandhi yaa la hanuunsinyi), ii inii shaksi bilaan eh yee hanaaneeyaasi iyaalki. Ku geebaadidiyaalki bershoo may in fahameenaa fariintun inii ki saabsinti haguugdi heloowki aafimaadki: 'ninkii hanuunsin inii li daaweeyeeyu yu.' Koo kumid eh dadki ki hadalaaw Maaygi oo kumid eh haan uni wareysini mi sheegni inii ki saabsinyi dabeeli.

Sawirki lamaad oo li tijaabiyi (Sawirki 3) may ki saabsinyaa gudbiyoowki udurki dabeeli. May muujiyaasee jiditee inki badin oo udurki dabeeli in gudbiyaaw iyaalki mayni ki baagteey inii li hegaajiyu nadaafidi guud. Mar kali, koo kumid eh ku geebaadidiyaashi (hanoo badin oo walni in abtugaani walni in akhriyaani oo in akhriyaan Mahaatirigi) haliishooni mili hariiriini sawiraantun dabeeli. 'Mi fahamni dhigaali ku koreeytu boorki', yaa erti islaantoo bilaan eh. Dadki may gorodeenaa "nin ki haaraaw raashiin meeli yaalu ii iyaal mandahaayaan." Dad badin yaa boorki la hariiri yi walbaradoowki aafimaadki guud oo ki saabsin nadaafidi ii uduroo.

Boorki sedehaad oo uni tijaabiini (Sawirki 4) yaa muujiyi habki tilaalki dabeeli. Ku giibgaliyaalki intiyoo badin may in maleeyaayeena inii yee tusiyaasu meel hanaaneen aafimaad oo bilaanti ki biyaayaan hanaaneenti

owladi. Bershoo yaa in agoonsidi inii isu ki saabsinyi tilaalki dabeeli ('May ki arigaanee qof ilbaabki roogu oo helaaw daawadi afki liki tifijiyaaw'). Ku giibgaadidiyaalki may odsideenaa inii dhigaalki luku weelu Maay, dadkini inii in ekaadaan 'dadki dhaginkeen.'

Fahamlanti ololooyinka tilaalki ii ma'alumaaadki yaa ki daree dareenki horaan in jeri oo tokoroowki ii tokoroowki dadki ki hadalaaw Maaygi


Dadki ki hadalaaw Maaygi yaa mudi dheer li kulumaayi takeor dhinigi afki eh oo ki dhahjeru bulshidi ki hadalaasu afki Mahaatirigi. Dad badan yaa in arigaayaan afki Mahaatirigi inii liki hoojiyoohaayu siminaan laanti bulshiyeed oo in dhaheytu dadki ki hadalaaw Mahaatirigi ii luuqadoo kali. Hiligii gumeysigi ii haanoo kumid eh warteelki dowlidi, Radio Mogadishu walii tabiya jareey warki Maaygi oo wehiliyaasu Mahaatirigi. Hiligii huriyidi, Radio Mogadishu yaa surunjiyi baahiyowki Maaygi, waliilay sii Wadeey Mahaatirigi. Dadki ki hadalaaw Maayga walii horay in dareemeenaa takooroow, dareenki taariikheed oo dhiyaaw ii ku saaroowki yaa luku yaabi inii

Fayruska cudurka dabeysha waxaa uu ka soo faafaa saxarada qof sida feyruska. Waxaa uu jirka ilmaha kale u soo maraa, biyo aan ammaan ahayn iyo gacmo wasakh leh.

Caado ka dhigo gacmo-dhaqasho

4 waqt oo muhiim ah

- Ka hor karinta iyo bixinta cuntada
- Ka hor cunto cunista iyo quudinta carruurta
- Ka dib isticmaalka Musquusha
- ka dib asturidda saxarada carruurta



Sawirki 3: Boor ki saabsin gaabibki dabeeli ki fafaasu ii ndaafidi.

Daawo ma laha cudurka dabeysha, laakiin laba dhibcood oo Tallaal ah ayaa looga hortegi karaa



Sawirki 4: Boor tusaaw gaabki liin maraaw tilaalki dabeeli.

saameen ki weeldhiti falnagoowki hadi jeru oo ma'aluumaadki aafimaadki dadweenaagi.

Ku giibgaadidiyaal badin yaa niili wadaagi waayo-aragnimadi tokoorki ki salaysin afki oo biyoowki adeegi ii gooboo hanaaneenti aafimaadki. 'Walii jirtay wakti ani tukaanki ki jeri oo wal ku gadidaayi, markii ani fadi inii ani alaabtay gadidu, dukaanligii ii ani isfahami waayni waani haas ku ku bahi. [Haalid ku badelin tii hori] walii in baheey isbitaalki si daawi haanki helu iyaalkeey, laakiin ani ii kii biyaayi hanaanidi aafimaadki miis fahamni. May jereey mar badin oo ani in fahami korni haan kali, gaar ahaan haan ki hadalaaw Mahaatirigi', yaa eri ninkoo.

Agabadoo dhinigi afki oo in dhaheeyu ku giibgaliyaalki ii shagaaloo aafimaadki yaa saameen ki leh heloowki hanaaneenti aafimaadki. Hartii sheegi inuu usu seedi haruun aafimaad usi ii iyaalsheey jirin oo in fahamaan afki dhaktarki ki duwahaaw: 'Mar kali yaa onigii li roori'. 'Maadaama ini infahamaani afshoo, adeegiyaalki aafimaadki I fahami waayeen' yaa erti islaan reer Deyniile ah oo ku sheekeeyaasu sidii in hanaaneeyi jerti iyaalshee: 'Dhamaadkii maalinti, is fahami waayni. Marki dhibaatidi taasaa haayti, aniiini agballi mar hadii onogeey buku, walii rajeeyeeyi inii li daaweeyi doonu'. Dadki may adeegsidaayaani heeladi shal bebedelin oo likili ta'aali koru. Tusaali haan, islaanti reer Dayniile walii adeegsidi jerteey dhagdhagaag ku muujiyaasu alaamadoo ii alaamadoo iyaalshee ii baahidi daawidi. Dadki ki hadalaaw Maayga yaa sharahi inii mararki gaar tukaameedi misi gooboo aafimaadki si wadajir eh in teegin 'kooh bilaarin' si taagyeeri in helaan.

Markii dadki ki hadalaaw Maaygi in fahamaani Mahaatiriga, walii sheenaasee inii dareemaan murigi, dhirif misi guud ahaan diidmi. Sidi koo kumid eh ku geeggaadidiyaalki si fudud in dhigi: 'Niinki dhibtooy af uni in kasaani.' Laakiin markii ma'aluumaadki la ha ki bandhigi Maay, dadki walii sheegeenaa inii dareemeen fan ii daryeel: 'Fahami: madi-dhuuri, lalabi, mandi, lafi-dhuuri ii haanoo kali, ii sidoo kali uriyaannimi. Walii dareemeey faan win oo ani ki farahasani inii wal badin ki fahami afkeey'. Nin kali yaa eri: 'Haa! Wal badin yaa ku fahami odki raadiyaagi[Maayga]! walii fadi lahaayey inii dhamaan gooboo raadiyaagi sidin nagidaan. Ni aawiyi lahaayti. Eed yaa in fahami. Dareen yaa ii buuysimee hataa. Hadii dhamaan gooboo raadiyaagi sidin ookali eyiin, eedaa inki farahi lahaai laakiin dhamaantyoo sidin ookali muku weelaayaan. Hadi wal badin yaa fahami; eedaa in faharasini! In kastoo eed in jeelaadi lahaayi hadii ku wadi weeli lahaayeen Maay'.

Fahamki gaabin walii luku yaabee inii hadidu kalsoonidi oliloo tilaalki

Markii dadki si buutu inki fahamaani ma'aluumaadki aafimaadki, walii nagidaayaanaa haanoo ki shakiisin oo ku

shakiyaaw tilaalki dabeeli. Ololiyaalki tilaalki oo dadki in fahamaani walii nagidi koraani haanoo obsi leh. Koo kumid eh ku geegbaliyaalkii Deyniile yaa araktidiyee dhiibiti: 'Dadki ku so'odu tilaalki dabeeli [ololaagi] yaa kooyi oo wal ki tifijiyi afki owladi. Eeyu dadki tilaalaaw owladi? Afjoo mi kasaaw, afkayni mi kasaayaan.' Walii jertee had gaar eh oo kalsooni darri eh markii luku hadalaaw tilaalki guud haantiis: 'Dadki bershoo ku obsidaayaan [gaadidoowki] talaalki udurki'; 'Walii in maleeyaayanaa inii talaalki sabibi doonu dhimishi'. Qofaa eri: 'Iyaalkay may ki haayee gurigi [markii ololo talaalki ki so'odu baaleey]. Hadii ani in kasaani afjoo, walii ku obsideeyi inii iyaalkeey li siyu sun.'

Hataa markii duuboowki liki akriyi Maaygi, ereyaalki bershoo mel fahamni

Odki dheginsidki oo Maaygi yaa eed liinku fahami dhigaalki ii sawireedi ii ajaladoo Mahaatirigi. 'Markii odki ki hadalaayi afkikeey eed yaa in fahami', yaa eri koo kumid eh ku giibgaadidiyaalki. Si kastibi haatoo, dhamaan eriyaalki Maaygi si isku mid eh mal in wadi fahamni, maadaama jeraan lahajadi shalshal bedelin oo afki Maaygi eh. 'Saddex-meelood hal meel ayaa khalad ki fahami', yaa eri odehy waayeelel eh oo ki hadalaaw lahajad ku bedelin tan la haa duubi. Dadki ilmi-baaroowkin liki wareysidi walii ki hadaleenaa lahajadi shal eh: Maay-baydhowi, Maay-Hamari, Maay-Bakool, Maay-Goryoleey ii Maay-Awdhiigli. Wali lahjad kasti oo Maay eh yaa eed liinki fahami markii liin firiyu Mahaatirigi oo adeegiyaalki aafimaadki. 'Walii ki dareenaa eriyi ani in fahamni, laakiin maywaa lahajad ku mid eh tan Maaygi ani ki dowahaaw, sidaas dartiyeel wal badin yaa ku fahami Alhamdulillahi', yaa erti islaatoo.

Erey biyoowki aafimaadki si feyli miin fahamni ku giibgaadidiyaalki ilmo-baaroowki hataa hadii liin ki turjumi Maaygi. Tan ma'aguulu: dad badin oo ki hadalaaw Maaygi walii ki tiirsinyiinaa daawooyin kali ii daawi dhagameed hanoo ku mid eh sababti oo eh daryeelki aafimaadki aadigi eh inti badin mel heli koru. 'Wali mi fahamni erey-biyoowki dabeeli waliina jeree eriyi kali oo ani wali li dhibtoodoohaayu', yaa erti too ku mid eh odiyaalki ki hadalaaw Maaygi oo reer Deyniile ku ba'adi markii yee dheginsiti ooditi afjee ki gorin. 'Walii jeree eriyi badin oo uni ki dhibaatoodaannu inii fahannu. Markii uni boogini haruumoo aafimaadki, walii inti badin li kulumeeyi magiyal oo horey liinki kasaani oo liinki weeraaw jirooyinki bershoo yoo liin firiyaw edeegsidoowgi erey biyoowki oo ku bedelin haanii uni aadiyaysini', yaa eri hal nin. Dad badin yaa in helni walbarashi toos eh waliibuwaa dad wal in goraani walni in akriyaani walishooni mel barni eriyi aafimaad oo Maay eh.

Eriyaalki haa so'odu oo Mahaatirigi misi Maaygi yaa inti badin li goridiwaayi misi si fayli liin fahamni: tilaalki afki, isku reeboowki, dabeeli, amooli, alaamidoo, awaagibidi,

Santuugi 1: isti'imaaloowki fikridi dabeeli (jinni) oo ololaagi poliyidi

Dad badin oo ki hadalaaw afki Maaygi yaa 'polio' ki tilmaami Maay inii eyi dabeel misi dabeel jinni. 'Dhaginkeen dabeeli walii li aamiinsinyaa inii ku dhaliti dabeeli jinnigi, daawidini may ki lug letaa uun ii alaab yeroo aadi eh', yaa sharahdi hal bilaang eh. Markii li fiiriyo ilmigi deegaank, dabeeli mey ki faafi kortee dabeeli misi walii lu ku gaadi koree geed hoostiis. 'Walii jeree wal markii adi geed hoos fadheetu kii dhiyaaw. Walii in kasaanee Hanfar (dabeel). Marki mey eraanee dabeel-jinni, walii in aamiinsinaa dabeelli-jinnigi'. Dad badin yaa ereyidiin ookali in isti'imaali inii ki tilmaamaan polio.

Meelii shagaaloo aafimaadki in isti'imaaleen ereygi dabeel si yoo in sheegaan udurki dabeeli, walii ku

aawiideey dadki ki hadalaaw Maaygi inii fahamaan, sidi dhinigi shagaaloo aafimaadki yoo kalsooni heleen. 'Walii ogaaneey inii dabeel sidaas ookali liki daaweeyi koru tilaal. Tan fikrid usubu maadaama markasti la hariiriini dabeeli daaweyyoowki uun dhagimeed', too bilaan eh yaa sheegti. Walii sheegteey inii owlaadiyee li tilaali ku reed markii sharahaad ku dheegti shagaaloo aafimaadki. Turjumaaneedi ii gaabeeyyoowki erey biyoowki li hariirtu fahamoowki bedelki eh oo aafimaadki, uduridi ii daaweyyoowki yaa luku yaabi inii dadki ki aawiidu inii si feyli in fahamaan walaa ku jeru.

gandhidi, jawigi kuleel, dhunjyoowki, doogi, fayriski, noo'eedi shalshal gediisin oo dabeeli, aabuugi, hergebki. Ereyidi sidi feyli liin fahami jeri walii haayeenaa alaamidoo yoo ku mid eyiin dhuun dhuurigi, madi-dhuurigi, alooli-dhuurigi, murug-dhuurigi, mandi, daal, goorti oo adkaadaasu, ii shubin. Sidaas ookali eriyidi bershoo mey in ekaayeenaa oo in dhawaagaayeenaa sidi Maaygi ii Mahaatirigi, tusaali haan: madi-dhuuri, tilaal, ii alooli dhuuri (*firi lifaagi 3*). Si kastibi haatoo, inti badin eriyiyaalki si ed yaa in shal bedelinyiin lamidi afood (*firi lifaagi 5*).

Ilmigi ki saabsin tilaalki dabeeli yaa yer

Haanoo badin oo kumid eh ku giibgaadidiyaalki ilmibaaroowki mi haysidaan fahan feyli oo ki saabsin alaamadoo ii alaamadoo udurki dabeeli, daaweyyoowsheey, ii tilaabooyinki ku horseedaawn oo li gaadi koru. Ma'aluumaad galid oo ki saabsin tilaalki (gaar haan tilaalki inii uriyaamiyi koru) ii sidi liin daaweyyaaw dabeeli yaa liki arigi tiri wareysidoow eh. ('daaweyyoowki may liin kaseeyi inii li mariyu daawi geed kuleel eh oo madigi li mariyaaw, dhamoowki daawidi ii Guraanki liki kor akriyo gofki jirin'). Dadki bershoo inti badin haan fahami in ku badin Mahaatiriga walii ku wargobeenaa jeroowki udurki dabeeli ii katarti usi ki leyti aafimaadki gofki ii gooski. 'Fahamsini inii udurki dabeeli eed halis in eyi oo sheena murug-dhuuri ii jir-dhuuri ii saas ookali daal. Hadii gofki in helni tilaalki walii luku yaabee inii in nuglaadaan uriyaannimi misi dhumiyoowki hubin hubnaa kumid eh'. Yaa eri koo kumid ah ha ku giibgaadidiyaalki. Laakiin may jereeey sharahaadyi kali oo badin oo ki saabsin sidi dabeeli in faafaasu oo kumid eyiin: 'Ani may ku aamiinsinnaa dabeeli inii islaameeyti gaadaasu markii haminkii binaanki jiifitu.'

Sibabti oo eh ma'aluumaadki mel ku heli koru afshoo, dad badin mi goridaayaan meel in bahaayaan misi me helaayaan edeeg aafimaad

Haanoo kumid eh agabadoo luugidi liinki hadali wargadun walii ku hor surumi koraanaa inii raadsidaa adeeg aafimaad. 'Haddii jiridu daawi mi weydiisididoonu wal fikrid eh ni miin haayu', yaa eri nin kumid eh dadki Deyniili kaas oo sheegi inii in fahami korni shagaaloo aafimaadki oo biyaaw daryeelki sidaas daraadiyeenii usi in fadaani inii daryeel raadsidu. Islaameey reer Deyniili eh yaa intaas ki darti: 'Wiligeey mi dheegni tilaal maani in baahini'. Fahan laanti meeli liku helaaw adeegi aafimaadki nooli li aamiini koru walii sidaas ookali dadki in horseedi kortee inii raadsidaa daryeel aafimaad oo dhagimeed bes eh: 'Haddii gofuriyaan eyi wal daliigee bes waliini liki daawaayeyi habitee daaweyyoowki oo dhaginki, waliini liki haayeyi manki gudaasheey. Faafowhsheey mi kasaanu, mi fahami kornu wiligeeyni mi dheegni', Hartii sidaas ki dari.

Dadki Maaygi ki hadalaaw ma'aluumaadki aafimaadki inii afshoo liinki gudbiyu yaa fadaayaan

Dhamaan dadki ki dowahaaw Maaygi oo li wareeyside walii odsideenaa ma'aluumaadki ki saabsin tilaalki dabeeli oo afshoo ki abtugin. Walii dareemeenaa inii saameenti ma'aluumaadki li heli koru oo Maaygi kordhiyaasuu gaadidoowki tilaalki. 'Walii feylaadi lahaayteey inii dadki afkeey kasaaw niin sheegaan si uni inki diidni walkasti oo sameeyaayaan waani sidi ani in tilaali lahaayi owlaadi sababti oo eh hadi mi kasaaw walaa yoo ki

hadaloohaayaan' yaa erti islaantoo. 'Walii jeelaadi lahaayneey inii wal kasti oo dheegaanu liki bedelu Maay,' yaa eri nin. Shagaaloo aafimaadki ee ki hadalaaw Maaygi yaa si feyli liin aamiini lahaayi. Ku giibgaadidiyaalki yaa sidaas niin sheegeen. 'walii in baahinää gof ani ki kalsoonni oo fahami koru inii niin sheenu tilaalki dabeeli oo ii ganiyu inii tilaalo owladeey. Taasu tan ani fadaaw', Yaa erti islaan kali.

Dadki saas ookali walii fadaayaan inii ma'aluumaadki aafimaadki liin gudbiyu si li fahami koru oo dhagin ii luugid haanbi hasaasi eh. Gobolki Banaadir oo tilaalki dabeeli deeraaw 95 bogolkibi reeroo, hab-hal-ibir-dhan yaa luku yaabi inii in haani habki inki waltarki badin oo

liki deeraaw onog kasti. Alaabti is deersiyooowi aafimaadki oo ki jeraan booriteedi, ii baroo raadiyaagi inii li suubiyu sifi koohoo shalgegediisin oo dadki in fahamaan. Taas ma'anaashee maywaa inii li isti'imaalu ereyi fufud oo fahamaayaan dadki walbarashidi rasmigi eh in lahaayni oo ki jeraan sawiraanti dadki in eg bulshidi ki hadalaasu afki Maaygi. Maadaama Maaygi eyi luugid adeegsidaan maamulidi ku jeraan hanoo kumid eh goboleedi dalki Soomaali. Walii jeree alaab oo isti'maalaayaan dadki ki hadalaayaan afki Maaygi oo in mudi eh ki hadali jereen dadki ki hadalaaw Maaygi oo deegaanidaas. Mi jertu in ki yeraan wal kharish eh oo liki hegaajiyaaw alaabtaas si liinki sameeyu alaabti afki Maaygi luku helaaw.

Lifaagi 1: Haa gaabiyooowki

CCCM	Camp Coordination and Camp Management (Maamulky iyo iski hirki kaamka)	MCAN	Marginalised Communities Advocacy Network (Shabakadi in doodoowki Bulshiyaalki la takoro)
IDP	internally displaced person (Dadki wadanki gudaasheey ki baraka'i)	MCH	Mother and Child Health Centre (Harunta aafimaadki hooyidi iyo onoga)
JVDC	Jubba Valley Development Centre (Harunta Hormariyowki Doohadi Jubba)	MoH	Ministry of Health (Wasaaraddi Aafimaadky)
HISA	Humanity & Inclusion for Sustainable Advocacy (Bini'aadintinimidi ii ku giibgiliyoowki oo i doodoowki iskifilinaanti)	MRG	Minority Rights Group International (Koothda aalamiga eh ee haguugdi dadka luku tiri badinyi)
KII	key informant interview (Waresiyaal hogogaal eh oo buuhu)		

Lifaagi 2: habki baaroowki (Wal sii wedi)

Daraasidin may edeegsiteey hab ilmi-baaroow oo tayi leh. Marki inki horayti may li hadalneey lami giibood oo kumid eh shagaaloo aafimaadki bulshidi yee oo koo kumid eh usi roogi Baydhobi oo afjeey aay usi eyi Maaygi haanaas oo ki howl galaaw degmo oo ki badinyiin afki Maaygi ii sidaas ookali haanoo kumid eh ma'aluumaadki aafimaadki yee eti Maay. Tan kali walii hayteey kooch ki hadalaasu afki aadi oo Mahaatirri oo Banaadir. Ujeedidi agood-shalbadelidoowki walii inki horeen haayteey inii lehilo habab aadi eh oo liki sheegaaw ami liki sharahaaw ma'aluumaadki ki saabsin tilaalki oo lamidi lahjadood misi luugadood. Walii soo-

duubneey howlwadiyaalki aafimaadki oo sharahaaw sediidi boor oo li doorididi. Tilaabidi lamaad koohdi ilmi-baaroowki may ki martigaadeey 24 ki hadalaayaan afki aadi oo Maaygi si yoo inku giibgaadidaan waresiyaal hogogaal eh oo buuhu (KIIS). Fiiri shahdi 2 si adi in goruntu dulmar KII-yadi walii ki tijaabiinay fahamoowki alaabti dhagesidki, booriteedi ii erezbiyoowki oo Mahaatirrigi ii Maaygi. Ilmi-baaroowkin yaa luku suubiyi seddi goobood oo ki tirsin gobolki Banaadir (Deyniile, Dharkeynley ii Wadajir). Fiiri Shahdi 1 si adi in helu dulmar ki saabsin gooboogii ilmi-baaroowki liki suubiyi ii sifooyinshoo.

Shahdi 1: Gooboo Ilmi-baaroowki

Goobti	Tilmaamoo
Deynile	Degmidi Deyniile yaa eh degmidi inki win oo Koonfurti bari oo gobolki Banaadir. Degmadun walii kumid ahaa dhanki tukud oo aasimid dalki ee Hamar. Degmidi Deyniili yaa may ki noolaa bulshooyin shalbebedelin waliini sanadoogii inki dambeeyi li arigaayeey koroow eed in win oo dadki ki nool ku dhaliti baraka'ayaal sababeen olaadoo ku jero dalki. Markii liin firriyu kutlidi CCCM oo Soomaaliyi Octobar 2022, Deyniili walii dejideey 1,302 goobood oo barika'yaal eh oo li hubiyi oo iskidarki hisaabtiyoo haayti 739,137 gof oo diiwaangalsin. ⁹
Wadajir	Degmidi Wadajir walii ki taalee gudoo gobolki Banaadir. Walii ki koobin taa geebti Koonfureed oo bartimoo Magaalidi Hamar. Wadajir walii aan ki etaan deegaanki ki nooliin dhagami shalbebedelin waliini kaalin buutu ku gaadidaasee dhagdhaagaayidi dhagaali ii bulshi oo gobolki. Degmidi walii ki koobintaan haafidi li deginyi, haruumi gana'asi, waliina martigiliyaasee haruumi dowlideed oo badin. Walii aan ki etaan suugteediye mashguulki badin oo ki jeraan oo ki jeraan suugi win ii suugi jareerti (Suug Bantu), waliini kumid etaan degmooyinki ki badinyiin Soomali Bantuudi (haanaas oo kumid eh koohoo luku tiri badinyi oo Soomaali.)
Dharkenley	Degmidi Dharkiinleey weybuwaa degmi ki tirsin gobolki Banaadir oo dalki Soomali. Walii ki koobintaan geybti Koonfureed oo magaalidi aasimidi Hamar. Degmidi Dharkiinleey yaa eh degmi si gaar eh in deegaayaan dad eed in fari badin waliina aan ki etaan suugiti feeyli, jiditi, mashguuli badin ii bulshi shalshalgediisin. Koo kumid eh suugiteedi aanki eh oo Dharkiinleey yaa liin kasee Suug Liif. Degmidi may martigiliyaasee koohi badin oo luku tiri badinyi ii kooho kali oo li tokorraw oo ki jeraan Soomaali Bantu ii Banaadiri. Walii kalee jere tiri kaamamki baraka'yaalki eh.

Shahdi 2: Tiridi ku giibgaadidiyaalki

Noo'i	Deegaanki			Wadarti guud
	Deynile	Dharkenley	Wadajir	
Bilaang (20 – 30 sini)	5	–	2	7
Bilaang (31 – 40 sini)	3	1	–	4
Bilaang (41 – 50 sini)	1	–	–	1
Bilaang (51 – 60 sini)	1	–	–	1
Megel (20 – 30 sini)	1	1	–	2
Megel (31 – 40 sini)	5	1	2	8
Megel (41 – 50 sini)	–	–	–	–
Megel (51 – 60 sini)	–	–	1	1
Wadarti guud	16	3	5	24

Shahdi 3: Diiwaanki ku giibgaadidaagi


Tilmaamoogi	Bogolkiiibi
Jinsigi	46% megel, 54% bilaang
De'di	20 – 30 sini – 38% 31 – 40 sini – 50% 41 – 50 sini – 4% 51 – 60 sini – 8%
Khibriidi shagi	Farshahan – 4% Raashiiin Kariyow – 4% Booyaasi – 4% Booyaasi – 42% Xoogsiti – 17% Hamaali – 4% Tukaanli – 4% Shagi laan – 21%
Heerki Walbarashi	Wal an baranee' – 83% Qur'an barati – 12% Agoon leh – 4%
Mudidi roogooowki	1 – 3 bilood – 4% 4 – 6 bilood – 8% 7 – 9 bilood – 17% 10 – 12 bilood – 17% 13 – 15 bilood – 4% 16 – 18 bilood – 4% 19 – 21 bilood – 8% 22 – 24 bilood – 33% 25 bilood – 4%
Goobti	Deynile – 67% Dharkenley – 13% Wadajir – 21%

Aruuriyoowki hogoo aasaasigi eh

Hog aruuriyoowgi aasaasigi eh walii fuliyey ilmi-baariyaal ku shal so'odi seddi hay'adood oo aafimaad: Shabakadi in doodoowki Bulshidi li kasaaw (MCAN), Haruunti Hormariyoowki Doohadi Jubba (JVDC) II Humanity & inclusion for Sustainable Advocacy (HISA). Ilmi-baariyaal ki hadalaaw Mahaatiri ii Maay yaa liin dooridi ilmi-baaroowkin. Walii hoogi saarneey tiyaabidi fahamki.

- Galibki afki walii in shidnay dhoor doorishi dadki ki hadalaaw Maaygi. Marki hore walii ki duubnay ajalid horay liin duubi oo Mahaatiri eh; walii isti'imaalnay ajaladi dhabti eh oo masuulyiinti ha ku dhiyeen idaa'adoo si dadki inki ogosiinu ololiyaalki tilaalki. Marki lamaad walii shidnay muugaal usub oo li duubi oo eh shagaali aafimaad oo ki hadalaaw Mahaatiri oo sharahaaw mid

Boorirki uni tijaabiini



ku mid eh boorarki ma'alumaadki. Marki seddehaad walii duubnay ajalid si gaar eh liin duubi (liki duubi Baydhabo) taas oo sharahaasu isli boorki Maaygi.

- Galibki daaba'in walii tusneey dhawr boorar eh oo isti'imaalaayaan shagaaloo aafimaadki ololo tilaalki (*fiiri sawirki 2*) yee oo marki hore wal dhigaal eh liiki daabacni. Ku reedni walii li wadaagnay boorirki goraalki sharahaadi oo Mahaatirigi. Ku giibgaadidiyaalki yaa ku reed li waydiisidi inii ku fiirsidaan walii ki jiru. *Fiiri shahdi 4* sidi boorirki liinki giibiyi koohdi.

Dhamaan waraysidiyaalki wal duubi ku reedni Ingriisa liki turjumi. Falangeeyoowki dhamaan walaagaas walii sameeyey ilmi-baari ki hadalaaw Ingiris oo CLEAR Global eh.



Shahda 4: Sidi boorirki liin tijaabiyi

Tijaabadi	Koohdee
Barti raadiyaagi – Mahaatiri	Dhamaan
Gudbinti – Mahaatiri	Barti raadiyaagi1 (HISA)
Gudbinti - Maay	Boorki gudbinta 1 (HISA)
Alaamadoo – Mahaatiri	Boorki alaamadoo 2 (JVDC)
Alaamadoo - Maay	Boorki alaamadoo 2 (JVDC)
Tilaalki – Mahaatiri	Boorki tilaalki 3 (MCAN)
Tilaalki – Maay	Boorki tilaalki 3 (MCAN)

Tihgiliyoowki Edebtii

Koohdi ilmi-baaroowki walii rateey habraacyidi edebti ilmi-baaroowki aadigi eh oo ki jeraan raa'owki nidaamki ogolaadoowki wargiliyoowki, gariyoowki ma'aluumaadki shaksigi, ii keediyooowki ma'aluumaadki badbaadsin. Intaas walii dheeraa nidaamka li suubiyi si liin hubiyu inii ki giibgaliyaalki li siyi fursid ki weydiyaan su'aali ki saabsin tilaalki ii dabeeli dhamaadki wareysigi. Habsaas may li siiyay fursid yoo ki heli koraan ma'aluumaadki aafimaadki oo siyya shagaale tababar oo geeb ku eh ilmi-baaroowki (yoo oo in halaayaan natijjidi ilmi-baaroowki).

Hadidinaanti

Koohdi ilmi-baaristi walii li kulimeenaa agabadi dhoor eh. Ku warhaayoowki shal bedilinaanti luugadoo Soomaali oo

eh tu eed in wiing sidi kor liki sheegi haanoo kumid eh dadki ki hadalaaw Maaygi yaa gaadidee shahaadooyinki Mahaatirigi yoo oo li falgalaaw bulshidi gobolki Banaadir muddi ku reed. Markasti mi fududaani inii li ogaadu inii kan ku giibgaadidaaw usi ki hadalaaw Mahaatiri ii Maay yoo oo li waydiyi hal su'aal. Nidaamki walbarashidi Soomaali walii si gaar eh in adeegsideeyi dhigaali abtugan oo Mahaatiri eh. Meeloo liinki hadalaaw Maaygi, ma'alimiinti walii ki kabaayaanaa hanoo yoo oo isti'imaalaaw eriyaalki Maaygi oo fasalki dhatiis, laakiin natijjidi may etaa inii Maaygi eyi luugid dad yar barideen akhriyoowsheey ii goroowsheey. Heloowki kooh wareysidi kortu oo in badeli koru nuhurki Maaygi duuboow walii haayteey too adig. Heloowki turjumaani oo ha ku turjumi koru Maaygi oo Ingiriis i turjumo yaa eed inku sii dhib badinaayti.

Lifaaqa 3: Eray biyoowki muhiimki eh

English	Mahaatiri	Maay
Abdominal pain	<i>calool xanuun</i>	<i>alool dhuuri / uur dhuuri</i>
Aching muscles	<i>murqo xanuun</i>	<i>Murug dhuuri</i>
Bowel	<i>Saxaro</i>	<i>Udu /xaar</i>
Consequences	<i>Cawaaqibta</i>	<i>Natiijo humy</i>
Dangerous	<i>halis ah</i>	<i>Wal eed iyo eeda lanka obsadoow</i>
Diarrhea	<i>Shuban</i>	<i>Shuban</i>
'Different types of poliomyelitis'	<i>'Noocyada kala duwan ee cudurka dabaysha'</i>	<i>'Udurky dabeely inta l shal bahaaw'</i>
Difficulty breathing	<i>Neefsashada oo adkaata</i>	<i>neefta ii kokooyaase / neefta oo kokooyaase</i>
Disabled person	<i>Curiyaan / Naafso</i>	<i>Jiis / Boosow</i>
Fever	<i>Xumad / qandho</i>	<i>Qandhydy / kor ugaar</i>
Headache	<i>madax xanuun</i>	<i>madi dhuuri / madaga i dhuuriyooye - suffering from headache</i>
High temperature	<i>Heer kulka sare</i>	<i>Habriir / Ugaar</i>
Hunger	<i>Gaajo</i>	<i>Baahi / yurqud / lees / shaafad</i>
Immunity	<i>Difaaca jirka</i>	<i>difaaca korka</i>
Malnourishment	<i>Nafaqo-daro</i>	<i>Nahal daro / hiil daro</i>
Oral vaccination	<i>Talaalka afka</i>	<i>Tilaalkyafky / Goojo</i>
Paralysis	<i>Curiyaan / Naafso</i>	<i>Boos / jiis</i>
Polio	<i>Dabayl / Cudurka dabaysha</i>	<i>dabeel (jinni)</i>
Protection	<i>Ilaalin / difaacid</i>	<i>magan galyo / waardi / iska waardiyeyyaase</i>
Safe	<i>Amaan</i>	<i>nabad galyo</i>
Sick / sickness	<i>Xanuun</i>	<i>Jiro</i>
Sore throat	<i>dhuun xanuun</i>	<i>Dhuun dhuuri</i>
Stiffness of the neck	<i>Qoorta oo adkaata</i>	<i>qoor adeeg</i>
Strong	<i>Xoog badan</i>	<i>Hoogun / hoogaa laya</i>
Swallowing	<i>Laqid</i>	<i>dhunjin</i>

... continued from previous page ...

English	Mahaatiri	Maay
Symptoms	<i>Calaamado</i>	<i>Alaamado</i>
Transmission	<i>iskugudbin</i>	<i>iska daarasho / dhibaal eh</i>
Treatment	<i>Daawayn</i>	<i>Daween qof oo ladaaweeyaaw</i>
Tiredness	<i>Daal</i>	<i>Noog</i>
Vaccination	<i>Talaal</i>	<i>Tilaal</i>
Vaccine	<i>Cirbada talaalka</i>	<i>Irbydy tilaalky</i>
Virus	<i>Vaayras</i>	<i>vaayras</i>
Vomiting	<i>Hunqaaco / matag</i>	<i>Mantaq / mandah</i>
Weak	<i>Daciif ah</i>	<i>tawar daro / hil daro / taag daro</i>

Lifaaqi 4: tijaabiyoowki sawirki

Sawir	Dadki walaa arigeen	Walaa yoo in fahamni	Walaa haa jeediyi lahaayeen inii li hagaajiyu
	<p>Onog jirin ii aadiis</p> <p>'Inii jiru iyaal meelun jiifu laakiin mi kasaaw walii ki dhiyi. May li eree? Kan mandiwi, kan kalini may liin kasee? Aadiisaab surin oo madigaa haayti, tanni lugaawaa kor in gaadoohayti, kan goortiis adagti laakiin mi kasaaw walii ki dhiyi, kani goortiis fooraarti anii arigi kori. 'misheegni walii eti.'</p> <p>'Iyaalkun aadiis garab surinti yaa gandhi li jirin onogi kaleenii mandahoohaayi. mi kasaaw walii ki dhiyi.'</p>	<p>Inii sawirki ki saabsinaayi alaamidoo dabeeli.</p> <p>ereyidi ki abtugin boorki yaa eh haanoo liin fahami korni maadaama ki gorinyiin Mahaatiri oo inki gorinaani Maay.</p>	<p>afki inii Maay nagudu, fartini wiwiinaatu ooni nadiif haatu. Sidaas ookali: 'Sawiraanti owlaadi inii li badiyu.'</p> <p>sifi si falii liinki fahamu, onogi inii liin sawiru si run eh oo liinki sawirni sidi alaabti liki iyaaraaw.</p> <p>daawadi inii limuujiywuu, tusaali haan yee oo liin maraaw sawiraanti ku hor ii ku reed: 'Walii ii li etaai inii faylaadi lahaayti hadii sawir luku gaadu ku reed markii gaadidaad waraagidoo daawidi oo dareemaan. si in arignu meeli ki jiridaayaan ii meeli ki roonaadeen.'</p>

... continued overleaf

Sawir	Dadki walaa arigeen	Walaa yoo in fahamni	Walaa haa jeediyi lahaayeen inii li hagaajiyu
 <p>Sawir</p> <p>Bidix:</p> <ul style="list-style-type: none"> – Gof fidhiyu/gof saharoodoohaayu <p>Dhati:</p> <ul style="list-style-type: none"> – Liin fahami sidi fikradi / alaamidoo in surin saharidi, teesigi, raashiinki, ga'amoo / faroo, raashiinkim dadki gaar yaa eh hanoo nadif in haayni: 'Walii fahameey nadaafad la'aan inii udurki dabeeli bilaabidi koru.' <p>'Fahamoohaayi gof sahari ii matag leh, waliini arigeey inii teesigi diyaar in eyi inii gaadu markii ninki mandahee warkaaya shuban.'</p> <p>Midig (kori): gof wal gaduudin afki wal gaduudin afsheey ki jeraan / aamoohaayu / nin wadidu gaadi.</p> <p>Midgti (Hoos): gof walaa afki ki haaysidi / gof walaa aamoohaayi.</p>	<p>Bidix:</p> <ul style="list-style-type: none"> – Gof fidhiyu/gof saharoodoohaayu <p>Dhati:</p> <ul style="list-style-type: none"> – Liin fahami sidi fikradi / alaamidoo in surin saharidi, teesigi, raashiinki, ga'amoo / faroo, raashiinkim dadki gaar yaa eh hanoo nadif in haayni: 'Walii fahameey nadaafad la'aan inii udurki dabeeli bilaabidi koru.' <p>'Fahamoohaayi gof sahari ii matag leh, waliini arigeey inii teesigi diyaar in eyi inii gaadu markii ninki mandahee warkaaya shuban.'</p> <p>Midig (kori): gof wal gaduudin afki wal gaduudin afsheey ki jeraan / aamoohaayu / nin wadidu gaadi.</p> <p>Midgti (Hoos): gof walaa afki ki haaysidi / gof walaa aamoohaayi.</p>	<p>Sawirkaas may ki saabsinyaa sidi udurki dabeeli in faafaaw.</p> <p>alaamadoo (saharadi, teesigi, raashiinki, ga'amoo) in sheegtooy sheeki sidiyee eh adi oo in raa'yaani goraal.</p> <p>Dadki bershee mandigi min kasaayaan sidaas ookali laakiin aamaayaan.</p> <p>Ereyaalki ki gorin boorki mal fahami koru sidi ki gorinyiin Mahaatiri oo in haayni Maay.</p>	<p>Dhigaalki inii liki goru Maaygi dadki inii in ekaadaanwi dadki bulshidi dhatiyoo eh: 'Walii kalee jeelaadi lahaayey inii dadkaas li suubyo (li sawiri/li ekaadu) dadki Soomaalidi. Dadkaas mi eh hanoo ha ku jeedu beeli. walii jeelaadi lahaayee inii liki goru Maay, didkini liki weelu Maay.'</p>
 <p>Sawir</p> <p>dadki may sheegeenaa sharahaadi haa so'otu sawirki korsheey.</p> <ul style="list-style-type: none"> – Bini'aadimki / bilaanti bershee wal sawiri yoo oo wal goraaw. – Onogaa li siyi daawi ii misi biyi – Gofaa afki iyaalki wal ki turri – Gofaa iyaalki siyi tilaalki dabeeli: 'Walii arigeeyi iyaal li siyyaaw dibicoo dabeeli' – Walii jertee geber bac wedetu oo suubiyaasu tabibar wacyigilin' 	<p>dadki may sheegeenaa sharahaadi haa so'otu sawirki korsheey.</p> <ul style="list-style-type: none"> – Bini'aadimki / bilaanti bershee wal sawiri yoo oo wal goraaw. – Onogaa li siyi daawi ii misi biyi – Gofaa afki iyaalki wal ki turri – Gofaa iyaalki siyi tilaalki dabeeli: 'Walii arigeeyi iyaal li siyyaaw dibicoo dabeeli' – Walii jertee geber bac wedetu oo suubiyaasu tabibar wacyigilin' 	<p>Muugaalki guud koo eed in wareersinwu laakiin dadki bershee yaa in fahami sawirkun inii ki saabsinyi ololoо tilaalki dabeeli.</p> <p>Ereyadi ki gorin boorki mal fahami koru sidi Mahaatirigi ki gorin. Ereyaalki sidoo kali eedaa in yaryaryii inii la akhriyu.</p>	<p>Dhigaalki inii haaduwi Maay: 'Tan mi'eh too anii fahami koru. linki dhibtooy walaagun. Hadii Maay ku weelu fahami lahaay.'</p> <p>Dhigaalki inii haaduwi far wiwiin: 'Marki dhigaalun mey in baahintaa inii liki suubiyu harfi wiwiin, 'Sidoon kali dadki li sawirin inii in ekaadaanwu dad Soomaali eh.'</p>

Lifaagi 5: tijaabiyooowi goobti raadiyaagi

Walaa dadki fahameen	Walaa lahaa jeediyi inii li hormariyu
Booska odki 1: Mahaatiri – horaan liin duubi	
Fahamki giib kumid eh ereyoo muhiimki eh oo li kasaaw: ‘Marki hori walaa anii dhageysidi hadi in kastoo si feyli inki fahamni Mahaatirigi, hadi walii anii ku dheegi odki. Walii ku sheegi koree bes eh sidi (Barika’iyaalki) dadki baraka’i oo saas ookali sheegi inii saas ookali ki dari tilaalki udurki dabeeli. Ani haan lee fahami laakiin walbi mu ku fahamaaw Mahaatiri; Maay yaa feylaadi lahaayti.’	Kidhiib duubitaan Maay eh: ‘Duubitaan kaas limid eh inii liki sameeyuwu Maaygi si gofkasti in dheginisu kan isu fahamaaw.’
‘Walii enaa dad reer baadiyi eh, afki Mahaatirigi si fayli miin fahamaanu. Haddii walaa anii dhegensidi walii haayteey mar usi haa hadal gaadi udurki tilaalki ii in yar oo udurki dabeeli eh oo usi ki dari. Marki Mahaatiri si feyli miin fahamni. Walii jeelaadi lahaayneey Maaygi laakiin Mahaatiri yaa dadki ku dhageysidaayaan idaa’adoo. Si feyli miin fahamaanu.’	‘Wal fikrad eh miin haayu walaa mogin; mi kasaaw walaa leyiin. Hadii in sharahi koraan feylaadi lahaayti. usi oo leh aayi, tan mey in feeylaadi lahaayteey owladi sababti oo eh saas ookali mi fahamni; hataa mi kasaayaan afkeey. Haddii i dhahaan aayi kan kan’u i ereen wal fikrid eh miin haayu tan.’
‘Walii lee dheegeeyi tilaal maani kasaaw walii liki jeedu, wiligeey mi dheegni odkun; dheegi leey bes; Waliilee li ereey “tilaal, tilaal.” Laakiin wal uni helaanu mi leh. Mi owoodu inii anii fahamu.’	‘Inii wal badin liki kordhiywuu shagaaloo ii dadki Maaygi eh. Ilaa hadi walbi mi fahamni. Ani haanteey fahami kori inii gofki eyi Maay.’
“Walkali oo anii fahami mi jeraan udurki ii tilaalki usi sheegi.”	‘Firkideey, walii jeelaadi lahaayey inii liki duubu misi liki abtugu afkun sababti oo eh afkeeywu (Maay).’
‘Walbi mi fahamni walii dheegeey odiyaalki oo murumaayaan marki mi fahamni.’	‘Haa, afki Maaygi yaa mogin. Hubi hadii Maay haadi lahaayti inii odkin fahami lahaayi.’
‘Walii fehimeey gaar kumid eyiin tilaalki dabeeli oo iyaalki jeeyaaaw haruunti aafimaadki. Odki meeloo bershoo ku fahami laakiin si feyli miin fahamni.’	‘Walii jeelaadi lahaayey inii ki helnu ma’alumaadki Maay laakiin mi fahamni Mahaatiri.’
Dadki Mahaatirigi in dhalidi eedaa degdeg inkiki hadalaayaan Mahaatirigi: ‘Gofni mi fahamaaw hataa od baahiyagi. Haddii aan fahmi lahaa odka waa degdeg.’	‘Walii odsidi lahaayey inii haki gudbiyaan afkii aayoow ii Maaygi lamidibi, haa lamidibi ki shal badelinyyiin gofki wal dheegaaw ii gofki afki aadiis in fahamaani ii kan Maaygi.’
‘Sababti anii in fahamni meywaa barti radiyaagi eedaa hadalki in dedejiyaasi.’	‘Walii fadeeyi inii dheginisu idaa’adi Mahaatirigi ii inii liki daru Maaygi ii lahajadi gudoo. Dadki bershoo mey fadaayaanaa Mahaatiri haanoo kalini may fadaayaanaa Maaygi. Inii liisksi dheeli tiru oo gof kastibi inii usi dheginisu walii usi fahamaaw.’
‘Mi jertu wal kali oo anii fahami oo inku haani inii ku hadalaayaan tilaal.’	‘Walii jeelaadi lahaayey inii Maay liin bedelu.’
Haanoo kumid ah dadki ki hadalaaw Afki Maaygi fahanki Mahaatirigi eber yaa ku eyiin: ‘Walbi mi fahamni. 5 sini yaa roogi anii oo in fahamaani Mahaatiri marki anii walaa afshoo ki sheegaayaan mi fahamaaw. Suugi Bakaaraha yaa in baheehadini ha ku nagidee hataa reer Banaadirigi li falgalii waani marbi mi i dhibni. Walii ki dheginaa afki keey Maaygi. Walii meelun roogee 5 sini in kastoo anii inki hadali korni afshoo. Haddii li’l dhahu in sheen iyaalki walkastoo yoo sameeyaan in jeeyee.’	‘Haa, afki Mahaatirigi mey in baahinyaa inii liki bedelu afki Maaygi. Mi fahamaanu (Mahaatiri). Walii in baahinnaa afki Maaygi.’
	‘Od duuboowki raadiyaagi walii fadeeyi inii liki bedelu afki Maaygi. Mi kasaaw Mahaatiri laakiin in bedeleen Maay.’
	‘Walii jeelaadi lahaayey inii duubaan afkeey taas oo eh odkikeey oo anii fahami koru.’

Walaa dadki fahameen

Walaa lahaa jeediyi inii li hormariyu

Booska odki 1: Mahaatiri – horaan liin duubi

'Mi jeraan wal ani ku fahamaaw sababti oo eh iski dardarsinti. Beenaa kiin sheegee hadii ki eru walii jeree shay misi lami misi seddi oo ani ku fahami. 'Dheginsidi laakiin mi jeraan wal ani fahami.'

Ma'aluumaadki aafimaadki guud haan eedaa in yeriin:

'Mi jertu wal ani odkun ku fahami oo ani hadi dhegisidi. Mahaatiri bes leewu. Saas ookali mi kasaaw dabeeli walii eti.'

'Walii jeree wal ku sheegti dabeeli ii tilaalki. Inti kali mi fahamni sababti oo eh odki mey ki gorinyaaf anii in fahamaani. Walbi mi ku oshi.'

Barti odki 2: Maxaatiri – walii akriyeey shagaali aafimaad

Keliya fahamki geeb kumid eh hadalki Mahaatirigi:

"Haanoo mi fahamni laakiin kan fahami; haruunti aafimaadki ii gandhi ii maybaa ereenaa tabardori, halki haanoo kaleeni ku hadalaayeen wal badin."

"Walii fahamsinaa inii gobo hanuunki jirki. Inii ani in baha'u haruunti aafimaadki. Istaas lee fahami."

"Ninyow dhawaagin mi ed udurkuni daa'uunwu daa'uuni mey in kasaanee fuug-ba misi shubin ii mandi laakiin taas mi'iin edaani. Walii ki siyeeyi fikridi guud oo ani ku heli."

"Walii fahameey wal limid eh aafimaadki ii daa'uunki oo yoo sheegaayeen laakiin wal kali mijeraan."

"Walbi mi fahamni; haddi walii heleey aafimaad walii jeelaadi lahaayee inii dheginsidi od afkeey eh. Walii kiin sheegi koree inii fahami."

"Haa, odkun walii ku fahameey inii saharidi ii kaadidi iyaalki li jeeyu haruunti aafimaadki hadii wal gandhi eh liki arigu. Inti kali mi kasaaw."

"Walii dheegeey ereyal anii kasaaw. Mi fahamaaw ujeedidiyoow laakiin walii dheegeey yoo oo leh tumin ii tumin ii afar maalimood ii udurki dabeeli."

"Mi fahamni hal kumid eh walaa ani dhegisidi."

"Haa, fahan koobin yaa ku haaysidi ereyal yaryar oo khaas eh sidi dabeeli ii jeyoowki gofki jirin goobti aafimaadki." Ereyalkas walii inku haani walaa kalee luku hadali mi kasaaw."

"Inti yar oo ani fahami oo yee ki saabsin meybaa haayteey gandhi, daal, tabardori, shubin biyood ii mandi. Intaasu inti ani fahami. Alle haku barakeeyo."

Haki gudbi afki duuboowki afki Maaygi:

'Afki Maaygi yaa mogin, si uni in fahamnu ma'aluumaadki oo fikrideey ku dhiibidu.'

'Marki hori su'aalun may limid etaa tii adi horeey iin weydiidii. Walii horeey in sheegeey inii feyleti inii shagaaloo hooli wedaan isti'imaalaan afki Maaygi sifi si feyli liinki fahamu ii liin wada hariiru.'

'Mar hadii liki sheegi godobi muhiim eh walii jeelaadi lahaayey inii in bedelaan afkikeey si ani infahamu oo ani in biyu jawaaboogeey. Kii hori walbi muku fahamni. Walii fadeeyi inii baradu afki Maaygi.'

'Marki hori inti in dhaheeytu odki koowaad ii kan lamaad walbi mi fahamni. Fahamki tilaalki walii ku moginnaa Maay sidaas dartiye Maay inii liki daru wu.'

'Sidi ani horeey in sheegi, niinki dhibtooy hadal uni in kasaani.'

'Niin sheeng af kali hadii adi war oo fadaasu misi kiin sharahu. lin shid af ani kasaaw.'

'Codkun sidi ani kiin sheegi leewu. Walii fadiiyi inii ki dartaan Maay. Mey in waaysinni Maay? Sidee inku waayi kortaan Maay meeli isin haku duubteen odkin? Walii fadaanee afku Maaygi inii lahaa duubu. Walii fadaanee inii uni dheginsinu wal uni fahamaanu ooni wal ku baridi kornu. Taasaa afki keey eh.'

'Arintu meelun meybawaa inii uni in fahamaan afki Mahaatirigi. Walii dooridi lahaayneey inii niniing ki sheegu afkaanu maadaama taas eti tan uni fahami kornu. Mahaatiri mi fahami kornu.'

'May weeli weriyaagi kanaalki idaa'adoo hadii ki hadalaaw afkeey fahami fadi laakiin afafki kali mi eh af ani fahaaaw markii sheegaan "maxaa/ma'aha!" Walii in maleeyeyi hadii ha i weeriraayaan obsidee.'

... continued from previous page ...

Walaa dadki fahameen	Walaa lahaa jeediyi inii li hormariyu
Barti odki 2: Maxaatiri – walii akriyeey shagaali aafimaad	
'Walii fahameey bes eh mandi, shubin biyood ii gandhi hun.'	
'Fahansini inii gobo hanuunki jirki. Inii ani in bahuwi haruunti aafimaadki. Intaas lee fahami.'	
Haanoo badin mi fahamaayaan walbi: 'Odkun walbi mu ku fahamni.'	
'Walbi muku fahamni wallee iski dardaroo haayaan "juluk juluk".'	
'Odkin walbi mi ki fahamni.'	
'Sidi adi sheegti odki afki Mahaatirigi yaa haayi laakiin walbi mi fahamni.'	
'Marki odki ani hadi dhiegnsidi walii li mid eyaa kii hori oo wal fargi eh in dhaheeyu ma jeraan. Wali Maahaatiru wu. Kan ii kii horebi wal muku fahamni.'	
Barti odki 3: Maay – walii akriyeey shagaali aafimaad	
Markii duubooki liki wadaagi Maay si feylee liin fahami: 'Odkaan ani dhiegnsidi Maashaa Allahu. Tan ani ku hadaaliyi wu.'	Turjumaanki afki Maaygi diyaar ku weel: 'Walii fadi lahaayneey wa'iyi gilinti inii Maay liki weelu.'
Eriyaalki gaar oo Maaygi yaa liki yaabi inii in baahidaan inii li sharahu inkastoo dadki in goridaani ma'aanashoo. Walii muhiih ahaa inii ereyadi ilmigi noolaagi liin turjumaaw luugadi fudud: 'Walii dheegeey wal liin kasaaw uriyaannimo laakiin mi fahamni ma'aanaagi taas.'	'Maadaama etiin haanoo aafimaadki ki walwalsin walii fadaanee inii wal kasti in sameeytaan si isin in hubsitaan inii dadki ki hadalaaw etii lamadi luugadood oo Maay ii Mahaatiru si dadki kali in fahamaan.'
'Walii dheegeey wal liin kasaaw 'naafi'. Naafi maywu?'	'Marki hori guud haan af-soomaali iigu dheh. Walii eri lahaayeey gof kasti afsheey fahamee oo dadki Mahaatirigi ki hadalaaw hal ki gorooy afsheey kan Maaygi ki hadalaawni hal inki gorooy afsheey.'
'Alaamadoo haki bilaawidi markii hori mel kasaani laakiin haddii dheeego inii fahami walii jireey alaamadoo ki bilaabidi daal badin, gandhi badin, shubin ii mandi oo ani in fahamni.'	'Kan eedaa in fahami ii fikirshoo. Walii jeelaadi lahaayeey hadii is bedel liki sameeyi lahaayni luugidi si uni yoo dhan in fahamnu ii dhamaan Soomaalidi inku faa'ideysidaan tilaalki dabeeli.'
'Walii jereey ereyi badin oo ani in dheeegni oo aafimaadki li hariiru sababti oo eh mi barini aafimaad. Walii dheegeey ereyi badin oo aafimaad li hariiru.'	Haki gudbi ereyaalki muhiimki eh afki Maaygi: 'Araktideey walii aamiinsinaa inii faa'idi leti inii ardeydi bershee eh oo ani horeey haan sheegi liki turjumaaw misi liki sharahaaw Maaygi. Si ani ii dadki ki hadalaaw Maaygi si feyli inki fahamnu doodi.'
'Mi barini agoonti aafimaadki sidee ki isti'imaalee. Mi barini agoonti aafimaadki.'	
Lahajadoo Maaygi dhan isku mid ma eh laakiin yoo dhon wal fahami kori: 'Haa walii liku yaabee inii fahamnu seddi-meelood hal meel laakiin seddi-meelood meel yaa khaladaad in fahami.'	
'Walii ki dareenaa eriyi ani in fahamni laakiin waa lahajad lamid eh kaan Maaygi wal badin yaa ku fahami, llaaheyaa mahad leh.'	

Tixraa'oow

- 1 Ma'alumaadkun oo dhon walii isti'imaalaanee hingaadi Maay, inkastoo afkun sidaas oo kali liin kasaaw Mai, Maay Maay iyo Mai Mai.
- 2 UNICEF walii ogolaateey si yee in beedu ma'alumaadki ki saabsin faa'idooyinki tilaalki oo Maaygi oo tiri ku mid eh heriyoo IDP meelaas oo li ogyi inii dadki degin yoo ki jeraan haanoo kumid eh Koonfurti oo in badinyiin inii eyiin haanoo ki hadalaaw Maaygi. Go'aankin walii li gaadideey ku reed markii li haa gabigabeeyi shaqideey goobeed. Si walbo haatoo luku bilaawo bila Nofeembar 2023, awood miin weeldhine inii halno cadeen ki saabsin inii siyaasadun la fuliyi. Wada hadal yaa wili niin so'ode uni ii UNICEF oo wadishageen ku dheheeyto wasaarida aafimaadky si liin ogaado si lik hirgelyi fadii.
- 3 Baaritaani li suubiyyi yaa sheegee inii giimoo hadi jeru kor in dhaafaaw 95 bogolkiibi taas oo eh arin ajiib eh markii li fiiriyu ma'anaagi guud, laakiin nasiib daro mi deerni heerki li ki eribtiri udurki dabeeli.
- 4 <https://cornerstone.lib.mnsu.edu/cgi/viewcontent.cgi?article=1275&context=etds>
- 5 <https://clearglobal.org/resources/language-use-in-somalia-research-report/> and <https://clearglobal.org/resources/language-use-in-somalia-quantitative-research/>
- 6 Ibid.
- 7 Ibid.
- 8 Eno, Mohamed A. (2008, p. 221) The Bantu Jareer Somali: Apartheid-ka Geeska Afrika oo laga soo saaray. London: Adonis & Abbey Publishers.
- 9 Dadki li wareeynsidi yaa la hakki hulidi inii ki hadalaayaan lahajad kasti oo Maay eh laakiin in ki hadalaan/fahamin wal Mahaatiri eh mise eed in koobinti famshoo Mahaatirigi. Dad badin oo ki hadalaaw afki Maaygi oo Banaadir yaa baridi ki hadaloowki Mahaatirigi. Shakhsiyaadkun ma haayni wal khuseeytu ujeedooyinki gaarki eh oo daraasooyinkun liin suubiyyi. Mel og tiridi dadki ki nool hirooyinki baraka'ayaalki oo ki nool magaalidi Hamar ii nawaahishee inii ki hadali koraan oo bes eh misi fahami koraan Maaygi oo in lahaan heer shago oo Mahaatiri eh.

Ku shaqeeyoowki ilaaliyoowki huugdi dadki li ku tiri badanyi ii dadki asalki eh



Dhibaatooyinki dooheed oo luku maraaw ololaagi tilaalki dabeeli dalki Soomaali gudoosheey:
Maybaa diiridi liki saareey dadki ki dowahaaw lahjadi Maaygi oo ki nool Banaadir

Ma'aluumaadki iskaashigi eh CLEAR GLOBAL, HISA, JVDC, MCAN ii Kooxdi Haguugul Insaanki luku tiri badinyi oo Caalimigi walii sahminayaan fahamki fariimoo tilaalki dabeeli oo baraka'ayaalki Hamar, Degmadi Banaadir, Koonfur Bari Soomaali oo ki hadalaaw Maaygi bes eh misi inti badin ki hadalaaw. Degaaleedi, ma'aluuli, ii fatahaadoo haa nanagidi yaa li arigi goosis tiri badin oo in guuri gudoo Soomali. Markin baahidi liin gobu biyoowki aafimaadki llii dhonyi oo gudoo hiriyaalki barika'ayaalki muhiimu. Ma'aluumaadki walii ki salaysinyiinaa wareesiyaal lili weeldhidi 24 ki hadalaayaan af-Maay seddi goobood oo kaamamki barika'ayaalki eh yoo oo li adeegsidaaw alaab shal babadelin oo ki jeraan gaabib tayi leh sidi imtihaan fahamoowki. Natijjooyinki may muujiyaayanaa inii haan ki hadalaaw kaliya misi inki horeyaan Maaygi oo si fayli inki fahamaani inti badin fariimoo aafimaadki oo ki saabsin tilaalki dabeeli ii dabeeli oo la haki bandhigi ololo tilaalki hadi jeru oo isti'malaaw lahjad kali misi luugid kali oo likiki hadalaaw Soomaali (Mahaatir). Aaladoo muugaalki eh ii sawiradi oo weheliyaasu dhigaalki Mahaatirigi oo isti'malaayaan shagaaloo aafimaadki si yoo inki sharahaan dabeeli dadki ki hadalaaw afki Maaygi yaa saan oo kali si feyli liin fahamaani. Natijjooyinkin may muujiyaayanaa inii haan ki hadalaaw Maaygi bes eh inii luugidi wadahariiroowki yee agabid ki eti taasii li mi'ini eh inii bershoo inki abtugaani barnaamijoo wa'iyyigiliyoowki tilaalki taasni galin ku jeeysidaasu niyi-jabki dadaalki badin oo liki fadaaw inii 100% liki deeru heerki tilaalki si lli irib tiru dabeeli deegaanki.

Heerki kalsoonidi liki gobi ololaagi iribirkii udurki dabeeli oo ku jeru hirooyinki baraka'ayaalki yaa eh too hooseeytu, natijjooyalki ilmi-baaroowki walii muujiyaayanaa inki yeraan sababti oo eh la'aanti metalaadi goowmiyadeed oo alaabti arigi oo hadi jeru ii moginaanti turjumaadi hasaasigi eh oo dhaganki ii luugidi oo ololaagi iribirkii dabeeli oo dadki Maaygi ki hadalaaw.

Ma'aluumaadkun walii ili muhiim eh in nagidi doontee shagaaloo aafimaadki, dadki in dhagdhagaagaaw haguugdi dadki, khubaridi dabeeli, ilmi-baariyaalki ii ololeyaalki aafimaadki oo Wadamoo Iniiskooyi oo fadaayaan inii fahamaan baahadi siyaasadoodo aafimaadki dhagamidi shalshal bedelin oo Soomaali ii baahidi liin gobi inii mudunaanti li siiyu dalibaadki koohoo luku tiri badinyi oo barika'i. Heloowki aafimaadki yaa li wiigi yee oo sabab in eti wal in jerni oo li suubiyi misi li aamiinsinyi inii dadki ki hadalaaw Maaygi ii Mahaatirigi fahamaayaan lamidi afood taas oo weeli sidi ma'aluumaadki liin faafiyaaw, taasoo saameen hun ki weeldhidaasu heerki tilaalki.

Ma'aluumaadkun walii sidaas oo kali la ha ki gabibabeeeyey in hadii ololyaalki aafimaadki oo liinku dan leyin inii liki dabargooyu udurki dabeeli oo Soomaaliya liki hadalaaw gaar haan afki, bulshooyinki ii dhaganki ii arimoo tokoorooki koohoo luku tiri badanyi oo mudunaan liin siini oololo dabeeli oo heerki dhigaali ii tabibarki shagaaloo ii gaabeenti feeyli oo sugunaanti ii alaabti arigi hadafeedi liki deeraaw 100% heerki tilaalki oo dadki deegaanki oo ki nool Degmadi Banaadir yaa haadi dooni haanoo adig.



Kooxda Xaqqoqda Yaryar ee caalamiga 54 Wadada Ganacsiga, London E1 6LT, United Kingdom
Tel +44 (0)20 7422 4200 Fax +44 (0)20 7422 4201 Email minority.rights@minorityrights.org
Mareegta interneetka www.minorityrights.org



ISBN Online 978-1-915898-10-4.

Boogooy shabakadi www.minorityrights.org si adi in helu ma'aluumaad badin oo ki saabsin dadki liku tiri badinyi ii dadki asalki eh oo aduunki.